HESHIIS KALA GADASHO GURI DAAR AH IYO XAQUUQDA KU SAABSAN DHULKA UU KU DHISAN YAHAY: = = = = = = = = = = = =

JAMHUURIYADDA DIMOQORAADIGA SOOMAALIYA

Maanta oo ah 29ka Bisha Febrayo 1984, Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed, oo saldhiggeedu yahay Muqdisho, Waddada Corso 1-Luuliyo, laguna dhisay Sharciga Lr.8 ee 31kii Jannaayo 1968, loona dhisay inay hormariso Dhismaha Guryaha D/Weynaha(Q.C.P.), kuna hormariso dhismo qudmo yar, isla markaasna ay Wasaaradda Maaliyadda - hanti ahaan u siisay, khaasna uga dhigtay Wakaaladdaas Dhulka ku yaalla Muqdisho, degmada Hodan, Xaafadda - Guryaha D/Weynaha ku tilmaaman Decretada Lr. 172 ee - 14/7/1972. = = = = = = = = = = = = = = = = = = = = = = = =

Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed oo uu Wakiil ka yahay Maareeyaheeda Guud Inj. CABDULQADIR CABDI MAXAMED, waxay ka iibisay kuna wareejisay Jaalle MAXAMED GEELLE CABDI, oo uu ka joogo J/LE XASAN MAXAMUUD, oo asaguna Heshiiskaan ku caddeynayaa inuu u gaday una aqbalay - Jaallahaasi Guriga Daarta ah, Lr.39-D, oo ku yaalla - Muqdisho, Degmada Hodan, Xaafadda Guryaha D/Weynaha, kana koobani 2-qol jiif ah, 1-qol Jiko ah, 1-qol musqul ah, iyo Derbi ku wareegsan, kuna dhisan Dhul Demanyaale ah, oo Cabirkiisu yahay Mq. ; Soohdimihiisuna kala yihiin:-Waqooyi waxaa ka xiga Guri dad, Koonfur waxaa ka xiga Guri dad, Bari waxaa ka xiga -

..../....

1-3-84
330 Rwn 50001
1356

-Guri dad, Galbeedna waxaa ka xiga Jid cad; Gurigaas -qiimaha Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed ay uga iibisay Jaalle MAXAMED GEELLE CABDI, waa Lacag ah Sh. So. 12.077,34/= -(labo iyo toban kun todobaatan &todoba &Sodon&Afar - Santi), Lacagtaas oo dhammaanteed uu Gatahu wada sii-yey Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed. = = = = = = = = =

-Sidaas kor lagu soo sheegay darteed, waxaa la farayaa Jaallaha haya Buugga Diiwaalinta Rahanta ee Maxkamadda Racfaanka Gobolka Benaadir inuu Gurigaas uu ku qoro - Buugga Maguurtada uguna qoro magaca J/le MAXAMED GEELLE CABDI, sida sharcigu qabo. = = = = = = = = = = = = = = =

29 FEB 1984

Muqdisho

1)-

2)-

-REB.N. 24734 XAFIISKA NOTAAYAHA MUQDISHO

SAXIIX LA SUGAY

-Aniga oo ah Notaayo Dr.MAXAMUUD XUSEEN DIIRSHE, ahna -Notaayo Xamar, waxaan caddeynayaa in saxiixyada kor -ku qoran i yihiin kuwii runta ahaa ee Maareeyaha Guud Inj. CABDULQADIR CABDI MAXAMED, deggan Xamar, Soomaali -ah, iyo KASAN MAXAMUUD ku dhashay Wajid 1953, deggan Xamar, Soomaali ah, leh Pat.N.87489/83 ee Xamar, oo Heshiiskaan kala saxiixdeen. = = = = = = = = = = = = =

Muqdisho 29 FEB 1984 N O T A A Y A H A

(Dr.MAXAMUUD XUSEEN DIIRSHE)

........

KU/-XAFIISKA ILAALINTA BUUGGA MAGUURTADA EE MAXKAMADDA

RAGFAANKA GOBOLKA BENAADIR +=MUQDISHO=

UJEEDDO/- KU QOR BUUGGA MAGUURTADA

C: 85/XV B. G. N.
L: 59/I B. Q. maguurto
L: 59/II Tusmada Q. maguurto

LAGA QORE

1)-WAKAALADDA DHISMAHA SOOMAALIYEED, oo uu ka joogo Maareeyaheeda Guud Inj. CABDULQADIR CABDI MAXAMED; ======

LOO QORE

2)-MAXAMED GEELLE CABDI, oo ka joogo XASAN MAXAMUUD, deggan Xamar, Soomaali ah; ============================

Heshiiska Rep.N.24734 ee 29/2/1984, lagu canshuuray - Xamar 1/3/1984, N.330, Atti ~~Rubb~~ Privati, Vol.25; oo aan sugay isla aniga Notaayaha ahu, ee Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed ay ka iibisay kuna wareejisay Jaalle MAXAMED GEELLE CABDI, Gurigeeda Daarta ah, oo ku yaalla Muqdisho, Degmada Hodan, Xaafadda Guryaha D/Weynaha( Q.C.P.), kuna dhisan Dhul Demanyaale ah, oo Cabirkiisu yahay Mq.   ; kana kooban 2-qol jiif ah, 1-qol Jiko ah, 1-qol musqul ah iyo Derbi ku wareegsan, Soohdimihiisuna ay ku kala tilmaaman yihiin isla qoraalkaas. Sidaas darteed, waxaa lafarayaa Jaallaha haya Buugga Maguurtadada in uu ku qoro Gurigaas Daarta ah Jaallaha gatay magaciisa. ===================================

Muqdisho

N O T A A Y A H A

(Dr. MAXAMUUD XUSEEN DIIRSHE)

XAFIISKA RAHAMADDA

EE ..Xamar.........

Waxaa la Keenay Taariikhda Maanta Waxaana lagu oray :

L. ..85/XI........ B. Guud ee Nidaamka

L. ..59/II........ B. Qoraal maguurtada

L. ..59/II........ B. Qoritaanka

..Xamar........, taariikh ..3/3/84..........

J. D. Somaliyeed - Xafiiska ... Muqdisho

DHOWRAHA RAHAMADAYAALKA

Jaalle ..............................